

Macluumaad ku saabsan waxa ay tahay in aad sameyso marka lagaa qaado tijaabada baadhista cudurka koroonaha.

KU JIR GURIGAAGA ILLAA INTA AY KA SOO BAXEYSO JAWAABTA BAADHISTU. Qiyaastii 1-2 maalmood gudohood ayaad ku heleysaa jawaabta. Ma heleysid wax war-gelin ah oo ku saabsan in natiijadii jawaabtu ay soo baxdey. Booqo bogga www.helsenorge.no si aad u ogaato jawaabta baadhistaada iyo tan ilmahaagaba. Haddii aadan haysan fursad aad ku booqato bogga helsenorge.no, waa in aad la xariirto dhaqtarkaaga joogtada ah si aad u ogaato jawaabta baadhista. Sidoo kalena waxa aad wici kartaa lambarka koroonaha oo ah ☎ 55 56 77 00

JAWAAB BOOSATIV AH: BAADHITAANKII WAXA UU XAQIJIYEEY IN UU KUGU DHACEY KOROONE

Qof kasta oo laga helo karoone waa la soo wacayaa amma waxa farriin SMS ah u soo diraya dhaqtarka heengenka ah ee Bergen.

Haddii lagaa helo karoone waa in aad.

- Ku jirtaa gurigaaga.
- in aad masaafad u jirsato dadka guriga kula deggan, haddii ay suurtaggal tahayana in aad isticmaasho qol iyo musqul adiga kuu gaar ah.
- In aad nadiifiso gacmaha iyo guriga meelaha guudka kore ee gacmuhu taabtaan.

Dadka kale ee guriga kula deggani waa in ay is takooraan. Adiguna waa in aad is go'doomisid 10 maalmood oo ka bilaabmaya marka ay kugu bilaabmeen calaamadaha cudurku, iyo in aaney ku hayn wax qandho ahi maalinta ugu dambaysa is 10 ka maalmood ee aad ku jireyso is-go'doominta.

Baaritaan ku samee dadkii aad la joogtey waqtigaa jirradu kugu bilaabantey iyo labadii maalmood ee ka horreeyeyba. La xariir oo sii digniin ah in ay suurtaggal tahay in iyaguna ay qaadeen cudurka oo ay waajib ku tahay in ay is-takooraan. Waxaa kula soo xiriiri doona Xafiiska ka hortagga is-qaadsiinta cudurrada ee Bergen, kaas oo warbixin dheeraad ah ku siin doona.

**Shuruucda u deggan is-go'doominta iyo is-takooridda waxa aad ka akhrisan kartaa
www.bergen.kommune.no/koronavirus iyo www.fhi.no.**

JAWAAB NEGATIF AH : BAADHITAANKII WAXA UU XAQIJIYEEY IN AADAN QAADIN KOROONE

Haddii marka aad booqato bogga www.helsenorge.no ay jawaabta kuu soo baxda ku qoran tahay «Ikke påvist», waxa macneheedu yahay in aan fayraska karoonaaha lagaa helin waqtigaas tijaabada lagaa qaadayey. Haddii aad is-takoortey waa muhiim in aad ku sii jirto is-takooriddaas illaa iyo inta 10 maalmood ee is-takooriddu ay dhammaanayaan. Waxa dhici karta in fayraska aad qaaddey laakiin haddana natiijada jawaabtu ay ka soo baxdo in aadan qabin fayraska. Taas oo ay sabab u noqon karto in aad ku jirto "waqtigii u dhexeeyey markii aad qaaddey fayraska iyo illaa inta aad ka dareemayso calaamadaha cudurka".

Haddii uu ku hayo " hargab caadi ahi " ama ay kaa muuqdaan calaamadaha astaanta u ah cudurrada ku dhaca hawo-mareennadu adiga oo aan xitaa ku jirin is-takoorid, waxa waajib kugu ah in aad ku sugnaato guriga illaa iyo inta aad ka dareemaysid xaalad caafimaad oo buuxda. Qofka ah shaqaale caafimaad ee isku arkey calaamadaha cudurku, waa inuu la xariirto maammulka goobta uu ka shaqeeyo ka hor inta aanu ku laaban shaqada.

Waa muhiim in aad booqato bogga www.fhi.no si aad u ogaato talooyinka adiga kugu habboon.

Haddii aad isku aragto calaamadaha cudurka inta aad sugeyso jawaabta baadhista amma inta aad ku jirto

waqtiga is-takoorida, waxa ay u badan tahay in cudurkii kugu dhacey, sidaad darteed waxa kugu waajib ah in aad si dhaqso ah isu go'doomiso. Sidoo kale waa in aad si dhaqso ah ugu war-geliso dadka kale ee guriga kugula nool iyo dadka kale ee aad la kulantey in iyaguna ay is-takooraan.

Raadso gargaar caafimaad haddii calaamadaha cudurka oo ay kugu sii kordhaan. La xariir dhaqtarkaaga joogtada ah amma dhaqtarka heeganka ah adiga oo wacaya telefoonka ☎ 116 117. Haddii ay xaaladdaada caafimaad noqoto mid halis ah, wac lambarka ☎ 113. Calaamadaha cudurka ee aad sida aadka uga feejignaanaeyso waxa ka mid ah sida haddii ay neeftu ku dhibto oo kale. Xasuuso in aad u sheegto marka aad telefoonka kula hadleyso hay'adaha caafimaadka in aad ku jirto is-go'doomim amma is-takoorid cudurka Covid-19 dariis.



BERGEN
KOMMUNE

BERGEN LEGEVAKT